



**DEEQDA GAARGAARKA
SOOGALOOTIGA
WASHINGTON EE COVID-19**

Qalabka Fariinta



Waxaa taageray oo maalgaliyey Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Washington.

Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19

Qalabka Fariinta WIRF

Dulmar

Soo dhowaada! Waad ku mahadsantahay shaqadaada aad ku caawineysid faafinta xogta ku saabsan **Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19**. Hadafka aaladan waa inuu kaa taageero dadaalladaada wacyigelinta loogu talloagalay soogalaatiga Washington. Wacyigelintaada darteed, waxaan rajeyneynaa in wararka ku saabsan deeqdaan ay gaarto dadka ugu badan ee macquulka ah, isla markaana ay dareemaan dhiirrigalin ay ku soo codsadaan. Waan ku faraxsannahay ka go'naanshahaaga aad ku xaqiijinaysid in tirada ugu badan soogalootiga deriskeena ee suurtagalka ah ay fursad ugu helayaan dhaqaalahaan.

Yaa loogu talloagalay aaladaan?

Aaladaan waxaa loogu talloagalay hay'adaheena heerka bulsho, hoggaamiyayaasha, iyo xubnaha bulshada inay u isticmaalaan inay ku faafiyaan xogta ku saabsan Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19, isla markaana ku caawiyaan dadka inay fahmaan waxa ay tahay iyo sida ay u shaqeyso, ayna ku dhiirogeliso inay soo codsadaan.

Sida loo isticmaalo qalabkaan

U isticmaal tusaale farriimeedkaan hoose inaad ku faafisid farriimaha taageerada, adigoo isticmaalaya boggaaga shaqsiga ah ama/ iyo hay'ada boggeedda. Dabcan, Fadlan ka yeel codkaaga iyo habkaaga.

Fariimo qaadida iyo Su'aalaha Inta badan La isweydiyo (FAQ)

Dulmarka fariinta

Fariinta heerka sare

Deeqda Gargaarka Degdega COVID-19— ee ka timid looguna tallogalay soogalootiga.

Hal ku dhiga

Soogalootiga midba midka kale daryeelaya.

Bayaanka kooban

Soogalootiga hadaan nahay, waxaan Washington ka dhiganay gurigeena. Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, isla markaana aadan u qalmin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, deeqdaan adiga ayaa laguugu tallogalay. **Codso Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 oo hel \$1,000 lacagta bixinta tooska ah ee halka waqti (illaa \$3,000 gurigiiba).** Xogtaada marnaba ogolaanshaheena lagulama wadaagayo dowlada, ICE, sidoo kale sharciga dallacaada bulshada (Public charge rule) ma quseyn karto deeqdaan. Luuqado badan ayaad caawinaad ku heli kartaa markaa arjiga diyaarsanayso. Maalinta ugu dambeyso ee la codsan karo waa 6-da Diseembar.

Bayaanka Dheer

Gudaha Gobolka Washington, soogalootiga waxay marwalba ahaayeen daris iyo shaqaale muhiim ah. Waxaan xoojinaa dhaqaalaha, ku tabarucnaa bulshooyinkeena, isla markaana daryeelnaa qoysaskeena.

Inta lagu jiro cudurka safmarka COVID-19, waxaan ku jirnay halista ugu sareyso ee lagu qaado fayraska, lumiyo shaqada, ama u baahan taageerida xubnaha qoyskeena oo qaabab cusub ah. Laakin dowlada faderaalka waxay si ula kac ah u cidleysay malaayin inaga naga mid ah oo aad ugu baahan taageerada dhaqaalaha, sababo la xiriira xaaladooda soogalootinimo.

Tani way qaldantahay. Dhammaanteen, kuwa ka yeeshay Washington gurigooda waxay u qalmaan taageero ay kaga gudbaan inta lagu jiro waqtigaan.

Taasi waa sababta inagoo ah hay'adaha ay hoggaamiyaan soogalootiga aan u kaashanay Gobolka Washington si loo aasaaso Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19. Sannadkaan, waxaan qeybineynaa \$40 milyan oo ah Deeqda Dhaqaalaha ee ka

timid Gobolka ee ku socoto soogalootiga Washington ee aan u qalmin deeqaha kale ee faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta sababo la xiriira xaaladooda soogalootinimo.

Waxaad Codsan kartaa Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 oo hel \$1,000 lacagta bixinta tooska ah ee halka waqti (illaa \$3,000 gurigiiba). Xogtaada marnaba ogolaanshaheena lagulama wadaagayo dowlada, ICE, sidoo kale sharciga dallacaada bulshada (Public charge rule) ma quseyn karto deeqdaan. Luuqado badan ayaad caawinaad ku heli kartaa markaa arjiga diyaarsanayso. Maalinta ugu dambeyso ee la codsan karo waa 6-da Diseembar

Waan iskala gudbaynaa wakhtigaan – sababtoo ah waxaan nahay Soogalooti midba midka kale daryeelaya

Sida looga hadlo deeqda

Waa muhiim in looga hadlo deeqda qaab xaqiiq ahaan sax isla markaana dhiirrigalin ah dhawaq ahaan. Markii aad ka hadleysid deeqda, isku day inaad joogteysid:

- **Wanaag iyo rajo**— waa inaan qirnaa dhab ahaanshaha fayraska Safmarka ah ee COVID-19 laakiin waa inaan ku faafinaa farriimo rajo iyo adkeysid Deeqdaan.
- **Dhab ahaanta**—deeqdaan si dhameystiran uma xalineyso dhibaatooyinka dadka, Dhanka kale maadaama deeqdaan ay xadidantahay, ma ahan in qof walba ee codsadaa uu helayo lacag. Waa inaan ka badbadin balanqaadka marka aanka hadlayno deeqda.
- **Xoojinta**—deeqdaan waa guul ay si adag ugu soo dagaalameen soogalootiga Washington. Hay'adaha Soogalootiga ayay ahaayeen kuwii u ololeeyey aasaasida Deeqdaan, isla markaana la shaqeeyey xafiiska Guddoomiyaha iyo Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Washington si ay uga. Waa inaan uga hadalnaa deeqdaan sida **Soogalooti midba midka kale daryeelaya**, ma ahan caawimaadda dowlada.

Waa maxay Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19?

Fariinta ugu muhiimsan

Dhammaanteen waxaa na saameeyay COVID-19, laakin dad badan ee ku nool Washington uma qalmaan deeqda faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta sababo la xiriira xaaladooda soogalootinimo. Marka Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 waxaa loo dajiyay inay taageerto soogalootiga. Waad codsan kartaa lacag bixinta tooska ah ee halka waqti oo \$1,000 illaa \$3,000 gurigiiba.

Fariimaha dheeraadka ah

- Kadib COVID-19 markuu ku dhufay, dowlada faderaalka waxay u dirtay \$1,200 lacag bixinada gargaarka ee lagu taageerayo inta badan dadka ku nool Mareykanka— sidoo

kale dad badan waxay fursad u haystaan cayrta shaqo la'aanta. Laakin kuwa badan oo inaga ah waa laga tagay sababo la xiriira xaaladooda soogalootinimo.

- Falcelin ahaan, isbaheysiga hay'adaha soogalootiga ah ayaa ugu baaqay dowladda Gobolka Washington in la aasaaso Deeq gargaarka oo u gaar ah soogalootiga. Asagoo ka duulaya baahida loo qabo gargaarkan, Guddoomiyaha ayaa u qorsheeyey deeq 40 milyan dollar ah inay maamulaan hayadaha aan faaido doonka ahayn, ayagoo caawinaad ka helaya Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Washington.

Maxaa Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 loo abuuray?

Fariinta ugu muhiimsan

Soogalootiga ahaan, waxaan ahayn qaar ka mid kuwa uu ugu darnaa cudurka safarmarka COVID-19. Si loogu hayo bulshooyinkeena si caafimaad iyo badbaado leh, waxaan u baahannahay inaan is taageerno hadeer. Taasi waa sababta hay'adaha soogalootiga ula shaqeeyeen Gobolka Washington si loogu helo dhaqaale soogalootiga aanan heli karin gargaarka faderaalka.

Fariimaha dheeraadka ah

- Washington waxay guri u tahay boqolaal kun oo soogalooti ah. Waxaan nahay shaqaale muhiim ah ee warshadaha ugu waaweyn Washington, sida beeraha iyo dhismaha—Isla markaana waxaan ku bixinaa in ka badan balaayiin doolar oo ah canshuuraha faderaalka, Gobolka, iyo deegaanka sannad walba. Waxaan nahay daris, saaxibo, shaqaale isla shaqeeyo, iyo xubnaha qoyska.
- Bulshooyinkeena waa kuwa ka mid ah kuwa ugu darnaa ee uu ku dhuftay cudurka safarmarka COVID-19. Kuwa badan oo inaga ah waxay waayeen shaqadooda, kuwa kale waxay aadaan maalin walba shaqooyinka na geliyo halista ugu sareyso ee gaarista, kuwa kale waxay ku daryeelayaan xubnaha qoyskeena guriga sababtoo ah fayraska. Qaar inaga naga mid ah waxay la barooranayaan dhimashada qaraabadeena.
- Iyada oo qof walba ogsoonyahay inaan nahay shaqaale iyo daris muhiim ah, naloo kulama dhaqmin qaabkaas: deeqaha sanduuqa faderaalka waxaa si ula kac ah looga reebay malaayiin inaga ah sababo la xiriira xaaladeena soogalootinimo.
- Taasi waa sababta hay'adaha bulshada ee soogalootigu hoggaamiyo ugala shaqeeyeen Xafiiska Guddoomiyaha, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Washington iyo Hay'ada sharciyada ee Gobolka Washington aasaasida deeqdaan. Dhammaan inteenaa Gobolkaan ugu yeerta gurigooda, waxay u qalmaan taageerada ay u baahanyihiin si ay wakhtigaan uga gudbaan.

Illaa iyo intee ayaan ka heli karaa Deeqdaan?

Fariinta ugu muhiimsan

Waxaad codsan kartaa inaad heshid lacag bixinta tooska ah ee halka waqti oo \$1,000 qofkiiba ilaa ugu badnaan \$3,000 gurigiiba. Waxaad u heli kartaa lacagta sida jeega kaashiyeerka ama kaarka hadiyada(Visa kaar).

Yaa codsan karo?

Fariinta ugu muhiimsan

Si aad u codsato deeqda gargaarka, waa inaad:

- Ku nooshahay Washington
- Ahaataa ugu yaraan 18 sanno jir
- Ay si weyn kuu saameysay cudurka safmarka (sida shaqo luminta, aad qaaday fayraska, ama daryeeleysid xubin qoyska ah oo ku dhacay cudurka)
- Aanan u qalmin helitaanka deeqaha sanduuqa faderaalka ama cayrtaa shaqo la'aanta sababo la xiriira xaaladaada soogalootinimo

Fariimaha dheeraadka ah

- Codsiyada waxaa lagu ogolaanayaa sida loo soo kala hormaro, maadaama deeqda guud ay xadidantahay. Waxaan mudnaanta siineynaa kuwa qabo baahiyada weyn.

Dad badan oo isku guri jooga ma codsan karaan?

Haa. Qof walba oo gurigaaga kaas oo u qalma Deeqda, isla markaana 18 sano ka weyn wuu codsan kara. Qof walba waa inuu soo buuxbuuxsada foomka codsiga ama arji asaga u gaar ah. 3 qof ka badan ma heli doonto deeqda gurigiiba (ugu badnaan \$3000 gurigiiba).

Sidee ayaan u codsadaa?

Fariinta ugu muhiimsan

Waxaad ka codsan kartaa onleenka, dhinaca taleefonka, ama boosto ahaan. Dhammaan sadexda iqtiyaar waxaa lagu heli karaa af Somaali. Maalinta ugu dambeyso ee la codsanayo waa 6-da Diseembar.

- Websaydka: www.immigrantreliefwa.org
- Taleefonka: 1-844-724-3737 (Isniin ilaa Jimce 9:00am – 9:00pm)
- Boosto ahaan: Booqo websaydka si aad u daabacatid foomka codsiga/arjiga

Fariimaha dheeraadka ah

- Ka hor inta aadan codsan, waxaad u baahantahay inaad diyaarsatid dukumentiyoo muujinaya aqoonsigaaga iyo daganaashahaaga xilligan ee Gobolka Washington. Tusaale ahaan, waxaad bixin kartaa koobiga kaarka aqoonsiga Gobolka, leesinka darawalnimada, ama biilka korontada oo ku qoran magacaaga iyo ciwaankaaga. Eeg liiska dukumentiyada la ogol yahay oo dhammeystiran.
- Ka codso onleenka www.immigrantreliefwa.org. Arjiga waxaa lagu heli karaa luuqado badan:
 - Shiinees
 - Ingiriis
 - Faransiis
 - Garifuna
 - Hindi
 - Koriyaan
 - Soomaali
 - Isbaanish
 - Sawaaxili
 - Tagaloog/Filibiino
 - Fiitnaamiis
- Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, Waxaad soo wici kartaa Taleefanka Hay'da Sanduuqa Midnimada Soogalootiga Washington (WAISN) 1-844-724-3737. Taageerada waxaa la heli karaa maalin walba ka bilow 6 AM-9 PM, luuqado badan ayaadna ku heli kartaa.
- Kadib markii aad codsatid, waxaad ku heleysaa aqbaaraha ku saabsan arjigaaga i-meel iyo farriin qoraal ahaan. Waa lagu soo ogeysiinayaa haddii arjigaaga la ogolaado 3 isbuuc gudahood. Haddii arjigaaga la ogolaado, waxaad ku heleysaa lacag bixinta 2 isbuuc gudahood.
- Deeqaheena way xadidanyihiin, marka ma ahan in qof walba oo codsadaa u suurto galeyso inuu helo gargaar waqtigaan.

Kuwaan waa dokumintiyada aad ku isticmaali kartid codsigaaga si aad u cadeysid aqoonsigaaga iyo daganaanshahaaga Gobolka Washington. Fadlan hubi inaad haysatid koobi cad oo midkood:

- Hal shey oo Liiska A, ama
- Min Hal shey oo Liiska B iyo Liiska C ah.

Liiska A: Dokumintiyada Daganaanshaha iyo Aqoonsiga	Liiska B: Dokumintiyada Aqoonsiga	Liiska C: Dokumintiyada Dagayaasha
<ul style="list-style-type: none"> ● Kaarka Aqoonsiga Gobolka Washington oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Leesinka Darawalnimada Gobolka Washington oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka Gobolka Washington ● Kaarka aqoonsiga ardaynimo xiligaan dugsi ku yaalo Gobolka Washington ● Biil / risiidka korontada oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka Gobolka Washington ● Biilka mobeelka ama intarneetka oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Bayaanka caymiska oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Bayaanka bangiga oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Risiidka Canshuur bixinta 2019 oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Rasiidka lacag bixinta ee ka timid badrooniyada oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington ● Rasiidka kirada oo muujinayo magacaaga buuxo iyo ciwaanka gobolka Washington 	<ul style="list-style-type: none"> ● Kaarka aqoonsiga ardayga oo dugsi walba ah ● Baasaboora oo wadan walba ah ● Kaarka qunsuliyada ● Warqada dhalashada ● Leesinka Gaari kaxeeynta Caalamiga ah ● Kaarka Metro oo la jiro sawir 	<ul style="list-style-type: none"> ● Warqad saxiixan ama taariiqeysan* oo sheegeyso magaca buuxo iyo lambarka qofka qorayo warqada ee ka timid shirkadaha soo socda: <ul style="list-style-type: none"> ○ Milkiilaha guriga oo qiraya daganaanshahaaga WA ○ Wakiilka ka socdo goobtaada cibaadada oo qiraya daganaanshahaaga WA

*Waxaad u isticmaali kartaa shaxda warqadaan codsigaan.

Warbixinteyda miyay illaalsantahay?

Fariinta ugu muhiimsan

Xogtaada marnaba ogolaanshaheena lagulama wadaagayo dowlada, ICE, hayadaha fullinta sharciga, milkiilahaaga guriga aad dagantahay, badroonigaaga, ama qof kale. Warbixinta oo dhan waxaa loo keydinayaa si illaalsan qaabka koodh leh marka lama geli karo.

Fariimaha dheeraadka ah

- Sida waafaqsan heshiiska aan la galnay Gobolka Washington, dadka kaliya ee heli karo warbixinta shaqsiga codsada ah waa Scholarship Junkies (hay'ada bulshada ee maareeyo deeqda), Hayada Fair Work Center iyo Ururka Deynta Seattle (ee qeybiso lacag) . Lama wadaageyno warbixintaada qof kale. Laakin haddii ay jirto codsi maxkamada sharciga, waxaan si sharci ah ugu baahan karnaa inaan siideyno warbixinta shaqsiga. Uma badna tani inay dhacdo laakiin waa suurtagal.

Sidee ayaa deeqda loo maamulaa?

Fariinta ugu muhiimsan

Deeqda waxaa maamulo hay'adaha bulshada soogalootiga ay hoggaamiyaan ee Washington—isla dadka u ololeeyey aasaasida Deeqdaan. Waxaa taageera, Lacagtana bixiya Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka Gobolka Washington.

Fariimaha dheeraadka ah

- Hay'adaha Bulshada ee ay Soogalootigu hoggaamiyaan ee Gobolka dhan ayaa la midoobay Xafiiska Guddoomiyaha, Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, Hay'ada Sharciyada Gobolka Washington si loo abuurto Deeqdaan. Inkastoo lacagta iyo Korjoogteynta ka timaado Gobolka Washington, ma ay qaabilaan warbixinta shaqsiga.
- Hay'adaha bulshada ee masuul ka ah deeqda ayaa dajiyey shuruudaha, qabta arjiyada / codsiyada, lacagta qaybiya, isla markaana xogta qof ilaaliya. Hay'adaha bulshada ee hoggaaminayo deeqdaan waa:
 - Asian Counseling and Referral Service
 - Colectiva Legal del Pueblo
 - Fair Work Center
 - Legal Foundation of Washington
 - Northwest Immigrants Rights Project
 - Nuestra Casa
 - OneAmerica
 - Raiz of Planned Parenthood
 - Scholarship Junkies
 - Ururka Deynta Seattle

- Washington Census Alliance
- Washington Dream Coalition
- Washington Immigrant Solidarity Network
- Dhammaan hay'adaha ku lugleh deeqda waxay la shaqeynayeen sannooyin bulshooyinka soogalootiga, oo ay ku jiraan shaqaalaha beeraha ee la hagrado, shaqaalaha mushaarka hooseeyo iyo soogalootiga ah Madaw, asal, LGBTQIA2+ ah, la nool curyaanimada, iyo kuwa kale oo badan. Waxaa dhammaantood ka go'an fayd qabka iyo arimaha gaarka ah ee bulshooyinka soogalootiga.

Miyaa lacagta ka imaaneyso deeqda iga celineysaa inaan helo fiiso ama kaarka cagaaran mustaqbalka sababtoo ah sharciga dallacaada bulshada?

Fariinta ugu muhiimsan

Maya. Caawinta ka imaaneyso deeqdaan waxaa loo tixgeliyaa caawinta gargaarka masiibada halka waqti, loomana tixgalinayo sida waafaqsan sharciga dallacaada bulshada. Helitaanka caawinta deeqdaan waa inaysan saameyn helitaankaaga karaka cagaaran.

Fariimaha dheeraadka ah

- Hadeer, waan ognahay in sharciga dallacaada bulshada uusan quseyn caawinta gargaarka masiibadaan. Si kastaba, sababtoo ah xeerarka soogalootiga dowlada faderaalka ee adag oo aan la qiyaasi karin, si buuxdo uma damaanad qaadi karno in sharciga dallacaada bulshada aysan badeleyn mustaqbalka.

Aaladaha Isgaarsiinada iyo Aqabyada

Isticmaal fariimaha tusaalayaasha soo socda si ay kaaga caawiyaan gaarsiinta bulshadaada xogta ku saabsan Deeqda Gaargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19. Fadlan, fasax baa u tahay inaad ku jaangooyso habka hay'aadaada ama codkaaga gaarka ah. Waxaan rabnaa dad ugu badan ee suurtoogalka ah ee u qalanto Deeqda inay soo codsadaan. Kuwaan waa dhaqaale si degdega loogu baahanyahay, waxaan rabnaa inaan hubino in dariskeena iyo saaxibada soogalootiga ay helaan taageerada iyo daryeelka ay u qalmaan.

Hal ku dhigyada la soo jeediyay

#WAImmigrantRelief
#WACOVIDRelief
#COVID19
#Coronavirus

Tusaalaha boostiyada warbaahinta bulshada

Facebook

- Soogalootiga hadaan nahay, waxaan Washington ka dhiganay gurigeena. Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, isla markaana aadan u qalmin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, codso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19. \$1,000 oo ah gargaar dhaqaale (ilaa \$3,000 gurigiiba) ayaa la heli karaa. Ka codso onleenka www.immigrantreliefwa.org.
- Arjiyada waxay u furanyihiin Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19! Warbixintaada marnaba si iqtiyaar ah loola ma wadaagayo dowlada ama ICE. Sharciga dalacaada bulshada ma quseyso deeqdaan. Wax badan ka baro oo ka codso www.immigrantreliefwa.org.
- Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 WAXAA sameeyay soogalootiga waxaana LOOGU TALLOGALAY soogalootiga. Codsiyada way u furanyihiin gargaarka dhaqaalaha kuwa uu saameyay COVID-19, oo aanan heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta. Wax badan ka baro oo ka codso www.immigrantreliefwa.org.
- Soogalootiga midba midka kale ayuu taageerayaa. Ka codso hadeer Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19, sanduuq cusub oo loo abuuray soogalooti uu saameyay cudurka safmarka fayraska korona. Wax badan ka baro oo ka codso www.immigrantreliefwa.org.

Twitter

- Soogalootiga midba midka kale ayuu taageerayaa. Codso Deeqda cusub ee #WAIImmigrantRelief. Haddii aad tahay soogalooti ay saameysay #COVID19, Waxaad heli kartaa illaa \$1k oo gargaar ah (illaa \$3k gurigiiba). Wax badan ka baro + ka codso hadeer 1-844-724-3737 / www.immigrantr reliefwa.org.
- Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 ee ka timid soogalootiga LOOGUNA TALLOGALAY soogalootiga. Warbixintaada way illaalsantahay + marnaba si iqtiyaar ah lagula ma wadaagayo dowlada ama ICE. Sharciga dallacaada bulshada ma quseyso karo deeqdaan. Haddii aad tahay soogalooti uu saameyey COVID-19, wax badan ka baro deeqda oo codso hadeer. www.immigrantr reliefwa.org.
- Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, oo aadan heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, ka codso Deeqda #WAIImmigrantRelief. Illaa \$1k oo gargaarka dhaqaalaha (illaa \$3k gurigiiba) ayaa helayaa. www.immigrantr reliefwa.org.
- Deeqda Gargaarka Degdega COVID-19— ee ka timid looguna tallogalay soogalootiga. Haddii aad tahay Soogalooti oo aadan heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, codso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 hadeer, waxaad heli kartaa illaa \$1k oo gargaarka \$\$
www.immigrantr reliefwa.org.

Instagram

- Deeqda Gargaarka Degdega COVID-19— ee ka timid looguna tallogalay soogalootiga. Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 ee cusub waxaa loo aasaasay inay siiso taageero dariska iyo shaqaalaha soogalootiga ah ee uu saameyey COVID-19. Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu la kulmayo waqtiyo adag oo aadan heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, codso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 ee cusub oo hel illaa \$1k oo deeq ah (illaa \$3k). Wax badan ka baro oo ka codso www.immigrantr reliefwa.org. #WAIImmigrantRelief
- Soogalootiga hadaan nahay, waxaan Washington ka dhiganay gurigeena. Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, isla markaana aadan u qalmin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, codso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19. \$1,000 oo ah gargaar dhaqaale (ilaa \$3,000 gurigiiba) ayaa la heli karaa. Warbixintaada way illaalsantahay oo si iqtiyaar ah loo lama wadaagayo dowlada ama ICE. Sharciga dallacaada bulshada ma quseyn karo. Ka codso www.immigrantr reliefwa.org #WAIImmigrantRelief
- Ma tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag #COVID-19 awgii, anaan na heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta? Taasi waa sababta aan ugu biimnay hay'adaha kale ee soogalootiga gobolka oo dhan si loo aasaaso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19. Waxaad hadeer ka codsan kartaa gargaarka dhaqaalaha oo \$1k (oo illaa \$3k gurigiiba) halkaan www.immigrantr reliefwa.org. #WAIImmigrantRelief

- Soogalootiga ayaa taageraya soogalooti. Taasi waa sababta Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 ee cusub loo sameeyey inay qabato. Haddii aad tahay soogalooti la kulmayo waqtiyo adag sabab la xiriirto COVID-19, oo aadan heli karin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, codso hadeer! Waxaad heli kartaa \$1k oo gargaar ah iyo illaa \$3k gurigiiba. Wax badan ka baro www.immigrantreliefwa.org. #WAImmigrantRelief

Qoraal gaaban ee lagu isticmaalo boostiyada sawirada (kudar loogada WIRF)

- Soogalooti midba midka kale daryeelaya
- Deeqda Gargaarka Degdega COVID-19— ee ka timid looguna talloagalay soogalootiga.
- Codso maalgelinta COVID-19. Booqo www.immigrantreliefwa.org ama soo wac 1-844-724-3737.
- Maalgelinta COVID-19 ee loogu talloagalay soogalootiga. Amaano iyo illaalsan.
- Codso hadeer.

Tusaalaha Qoraalada muuqaalka

U isticmaal qoraalka soo socda hagida muuqaalo qofku iska duubayo (selfie-style video) si aad ugu kaashatid inaad ku gudbiso xogta deeqdaan isla markaana dadka ugu dhiirrigalisid inay soo codsadaan. Aad ayay muhiim u tahay inaad ku dartid codkaaga iyo fikirkaaga, sida inaad ku darto sababta aad ugu malaynaysid in deeqdaan muhiim utahay.

Soogalootiga hadaan nahay, waxaan ka dhiganay Washington gurigeena.

Waxaan ku dadaalnaa maalin walba inaan caawino bulshadeena.

Maanta, oo cudurkaan safmarka uu saameynayo cid walba ee nagu hareereysan, waa waqtigii aan heli lahayn taageerada aan u qalano.

Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 waxaa loo aasaasay soogalootiga, waxaana aasaasey soogalootiga Washington si ay ugu deeqaan gargaarka dhaqaale.

Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, aadanna heli karin lacagta faderaalka, deeqdaan adiga ayaa laguugu talloagalay.

waxaadna heli kartaa \$1,000 iyo illaa \$3,000 gurigiiba. Warbixintaada way illaalsantahay.

Codso ka hor 6-da Diseembar. Si aad wax badan uga ogaatid, booqo www.immigrantreliefwa.org

Waxaan nahay soogalooti, oo waan is daryeeleynaa midba midka kale.

Markii ay suurtagal tahay, waxaan ku talineynaa in qeybta dhammaadka fiidiyaha ay ku jiraan loogada hay'adadaada iyo loogada WIRF.

Tusaalaha Fariimaha qoraalka

Nabadey [\[Magaca\]](#). Waxaan ahay [\[Magacaaga\]](#) ka socdo [\[hay'adaada\]](#). Waxaan rabaa inaan hubiyo inaad wax ka ogtahay deeqda gargaarka soogalootiga - ee ay dajiyeen soogalootiga looguna talloagalay soogalootiga Washington. Waxaa loogu talloagalay dadka aanan u qalmin gargaarka fayraska korona ee faderaalka sababo la xiriira xaaladooda soogalootinimo. Waxaad heli kartaa \$1K ee laguugu taageero adiga iyo qoyskaaga. Wax badan ka ogow oo ka codso www.immigrantreliefwa.org.

Nabadey [\[Magaca\]](#). Waxaan ahay [\[Magacaaga\]](#) ka socdo [\[hay'adaada\]](#). Ma Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 weli? Waxaad heli kartaa \$1K si laguugu taageero adiga iyo qoyskaaga inta lagu jiro cudurka safmarka COVID-19. Aan ogaado haddii aad qabtid su'aalo, wax badan ka ogow ama ka codso www.immigrantreliefwa.org.

Nabadey [\[Magaca\]](#). Waxaan ahay [\[Magacaaga\]](#) ka socdo [\[hay'adaada\]](#). Weli waad codsan kartaa Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19! Ka codso www.immigrantreliefwa.org ka hor 6-da Diseembar, waxaad heli kartaa \$1K si loogu taageero adiga iyo qoyskaaga.

Tusmada i-meelka tusaalaha

Nabadey [\[Magaca\]](#), waxaan ahay [\[Magacaaga\]](#) ka socdo [\[hay'adaada\]](#).

Soogalootiga hadaan nahay, waxaan ka dhiganay Washington gurigeena.—waxaanna u baahannahay inaan is taageerno midba midka kale inta lagu jiro cudurka safmarka. Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 waxaa aasaasay soogalootiga looguna talloagalay soogalootiga Washington si ay u siiyaan gargaarka dhaqaale. Haddii aad tahay soogalooti wajahayo waqtiyo adag COVID-19 awgii, oo aadanna u qalmin gargaarka dhaqaalaha faderaalka ama cayrta shaqo la'aanta, deeqdaan adiga ayaa laguugu talloagalay.

Codso Deeqda Gargaarka Soogalootiga Washington ee COVID-19 oo hel \$1,000 lacagta bixinta tooska ah ee halka waqti (illaa \$3,000 gurigiiba).

Deeqdaan waxaa aasaasay hay'adaha bulshada soogalootiga hogaamiyaan sida [\[hay'adaada\]](#). Inagoo ah [\[ama ayaga\]](#) waxaan maamulnaa deeqda oo qaabilnaa dhammaan arjiyada iyo lacagta, oo marnaba si iqtiyaar ah ulama wadaageyno warbixintaada dowlada ama ICE. Sharciga dalacaada bulshada ma quseysan karto deeqdaan. Waxaad caawin uga heli kartaa arjigaaga luuqado badan.

Na soo ogeysii haddii aad qabtid wax su'aalo ah! Wax badan ka baro oo ka codso
www.immigrantreliefwa.org.